# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## Golaha Shacabka

Muqdisho, Sebtember 6, 2015

Ku: Guddoomiyaha BFS = Muqdisho =

Og.: Madaxweynaha JFS = Muqdisho =
Og.: Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee JFS = Muqdisho =
Og.: Guddoomiye Xigeenka 1aad ee BFS = Muqdisho =
Og.: Guddoomiye Xigeenka 2aad ee BFS = Muqdisho =
Og.: Rai'sul Wasaaraha JFS = Muqdisho =
Og.: Garyaqaanka Guud ee JFS = Muqdisho =
Og.: Hantidhawrka Guud ee JFS = Muqdisho =

Ujeeddo: Jawaab-celinta Soo Jeedinta Guddoomiyaha Barlamaanka ee Mooshinka Xil ka Qaadista Madaxweynaha JFS.

### HORDHAC

**Mudane Guddoomiye,**

Annagoo ka jawaabeyna qoraalkaadii summaddiisu ahayd **847/11/01/09/ 15 ee 4/9/2015**, waxaan kuu soo gudbineynaa jawaabcelintan ku saleysan Dastuurka, Xeer Hoosaadka Baarlamaanka iyo Shuruucda Dalka;

Sarreynta Sharciga sida ku cad **Qod. 4aad ee Dastuurka J.F.S.** ma aha (optional) ee waa tiirka hagaya hay'adaha Qaranka, waajibna ku ah mas'uuliyiinta Qaranka iney u hoggaansamaan. Waxaana sharciga ka horimanaya in leysku milo awoodaha hay'adaha Qaranka, gaar ahaan sida ku cad **Qod. 3 aad ee Dastuurka** oo faraya in mabaadii'da asaasiga ee J.F.S. ay ku dhisan tahay mabaadii'da asaasiga ee awood Qeybsiga, waxaana waajib ku ah Gole kasta oo ka mid ah awoodda Dowladda inuu u guto waajibaadka saaran si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.

**Xilka Guddoonka Baarlamaanka ka saaran maareynta mooshinka**, inkastoo uu ugub yahay, haddana **sharciga ayaa tilmaan cad ka bixinaya**, habka loo

WAXAAN QABLEY JAWAAB CELINTII GUDDOONKU SOO JEEDIYEY KUW SAHABSANAYD MOTIONKII LAGA GUDBIYEY MADAXWEYNAHA JFS.
MR. ABDIKARIM BUH
XOGHAYAHA GUUD EE BFS 6/9/15

maareynayo, mana jirto wadiiqooyin kale oo ka duwan kuwa uu sharcigu tilmaamayo, oo la kala xusho ama lagu maareyn karo mooshinkan. Sharciguna wuxuu tilmaamayaa in ciddii si ka duwan habraaca sharciga u maareysa mooshinkan ay si ulakac ah xadgudub weyn ugu sameyneyso Dastuurka Qaranka, taas oo keeni karta mas'uuliyad Ciqaabeed.

Waxaan aamminsannahay in dadaalkaadu ku saleysan yahay doonis xal, hase yeeshee waxa xal noqon kara kan waafaqsan Dastuurka, Xeer Hoosaadka Baarlamaanka iyo shuruucda Dalka. Waxaan beegsaneynaa ifinta xal aan ka soo horjeedin sharciga iyo in Guddoonka uusan qeyb ka ahaan falal lagu wiiqayo Dastuurka, Xeer Hoosaadka Baarlamaanka iyo Shuruucda Dalka.

Bishii Agoosta 12da, waxaan u gudbinnay Guddoonka Baarlamaanka, Mooshinka Xil ka qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, oo ay keeneen saddex dalool oo hal **(1/3)** xildhibaanada Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, oo u dhiganta tirada guud ee BFS, si waafaqsan **Qodobka 92aad (Faqradiisa 2aad) ee Dastuurka Federaalka ku-Meel Gaarka ah.**

Wuxuuna waajibka ku saaran ee Dastuuriga uu ahaa inaad raacdo Dastuurka, Xeer Hoosaadka Baarlamaanka iyo Shuruucda Dalka, oo aad degdeg ugu gudbiso Maxkamadda, si ay sal ahaanta mooshinka go'aan degdeg ah uga gaarto, maadaama xadgudubyada mooshinka ku taxan ay dhammaantood yihiin kuwo ay waajib kugu ahayd inaadan daahin, gaar ahaan, iyadoo ay tuhummada kan ugu horreeya uusan u baahneyn wax caddeyn ah, isuguna jira xadgudubyo hawsha xukuumadda, Baarlamaanka iyo xuquuqda aadanaha oo dad muwaadiniin oo Soomaaliyeed ay naftooda ku waayeen, oo ay sabab u tahay dhaqangelinta **Xeer Madaxweyne Lr. 5 ee 28/01.2014**, oo lagu faafiyay faafinta rasmiga ah **Lr. 7 ee 30 Maarso 2014**, taasoo xadgudub weyn ku ah Dastuurka, Xeer Hoosaadka Baarlamaanka iyo Shuruucda Dalka, iyadoo aysan jirin Qodob Dastuuri ah oo siinaya Madaxweynaha awood sharci-dejineed.

Dhammaanteen ma fileyn, mana ah habraac sharcigu tilmaamay, in muddada intaa la eg iyadoo ay kasoo wareegtay, gudasho la'aanta xilkaas, in sabab laga dhigto mooshin aan sharciga waafaqsaneyn, **lagana dhigo muran siyaasadeed oo Baarlamaanka dhexyaal, loona baahan yahay heshiisiin.**

**Waxaana xusid mudan, in qoraalkaada, aadan ku darin ogeysiinta Maxkamadda ikhtisaaska u leh, taasoo ah dafiraad jiritaanka Awoodda Garsoorka;**

Sida kuu muuqan karta, weli waxaan dooneynaa, in arrinta mooshinka **lagu maareeyo xal sharci ah**, annagoo mar kasta si niyadsan diyaar ugu ah hirgelinta sarreynta sharciga.



ACB.

## DHALIISHA SHARCIYEED EE SOO JEEDINTAADA

**Haddaba, Mudane Guddoomiye,**

Asbaabaha aan u aragno inuusan qoraalkaada soo jeedintaadu waafaqsaney Dastuurka, iyo Shuruucda Dalka, waxaa ka mid ah, kuna ekeyn, inaad qoraalkaada summaddiisu tahay **847/11/01/09/ 15 ee 4/9/2015, in aad asal ahaan soo qorto,** maadaama uu Dalka ka maqan yahay Madaxweynaha, adiguna aad tahay ku-simaha ee aadan hayn xilka Guddoomiyenimada Baarlamaanka, taasina waxay si cad uga soo horjeeddaa **Qod. 94aad ee Dastuurka**.

**Waa sharci darro iyo ku xadgudub Dastuuri ah**, in iyadoo uu Dastuurka si cad uu u tilmaamayo inaad dhexdhexaad u noqoto xildhibaannada, una hoggaansanto sarreynta sharciga, sida ku cad **Qod. 4aad iyo Qod. 65aad faqraddiisa 3** ee Dastuurka Federaalka Ku-meel Gaarka ah, ayaad isbarbar dhigtay mooshin aan lahayn saldhig Dastuuri ah iyo mooshin ku saleysan **Qod. 92aad ee Dastuurka oo leh habraaca cad oo loo maro**.

Mooshin aan sharciga ku saleysneyn iyo Mooshin waafaqsan **Qod. 92aad ee Dastuurka, ma keeni karto sinnaba in loo fasiro khilaaf siyaasadeed;**

**Khilaaf siyaasadeedna, marnaba dhinac kama ahaan karo Madaxweynaha oo ah astaanta Qaranka,** Dastuur ahaanna wuxuu u dhexeeyaa hay'adaha Dastuuriga ah, sidaa darted xil-kaqaadistiisa ku saleyn ku xadgudka Dastuurka, marnaba ma noqon karto is-haysad siyaasadeed oo u baahan xallin, **waxaa tilamaan cad ka bixinaya sharciga xeer hoosaadka Baarlamaanka iyo Qodobbada Dastuuriga ee hoos ku tifaftiran:**

1. Sida ku cad **Qod 87aad faqraddiisa B ee Dastuurka**, waa astaanta midnimada Qaranka, **wuxuuna u dhexeeyaa Seddexda Awoodood;**

2. Xil ka qaadista ku saleysan **Qod. 92aad faqraddiisa 2aad**, wuxuu xeerinayaa in la xaqiijiyo in eedeyntiisu gundhig sharci ah ay leedahay oo aysan ahayn siyaasad, waana sababtaa waxa loogu gudbinayo Maxkamadda, **Guddoomiyaha Baarlamaankuna kama dhigi karo mid ku salaysan khilaaf siyaasadeed;**

3. **Tuhun Mas'uuliyad Ciqaabeed oo culusna lagama geli karo dhexdhexaadinta** aad soo jeedisay, maadaama aysan ahayn waxa laysku haysto siyaasad, waxayna ka soo horjeeddaa **Qod. 92aad faqraddiisa 2aad, loona gudbiyo si aan daahis lahayn Maxkamadda Dastuuriga,** taasoo ka gaabintaadu ay noqoneyso ishoristaag caddaaladeed **(Obstruction of Justice);**



AGB.

4. **Dastuurka iyo Xeer Hoosaadka Baarlamaanka, ayaa tilmaamaya xilka Guddoomiyaha Baarlamaanka ka saaran maareynta mooshin ku saleysan Qod. 92aad faqraddiisa 2aad**, waana kuwa hoos ku qoran:

   a. Guddoomiyaga wuxuu mas'uul ka yahay fulinta, **dhawrista Xeer Hoosaadka Baarlamaanka iyo ilaalinta Nidaamka Golaha, wuxuuna ilaalinayaa habsami u socodka hawlaha Golaha, sida ku cad Qod. Qod. 7aad faqraddiisa 1aad**;

   b. Sidoo kale, sida ku cad **Qod. 20aad faqraddiisa 1aad ee Xeer Hoosaadka Baarlamaanka ayaa sii fasiray,** wuxuuna qeexaya in "haddii ay Guddoomiyaha Baarlamanku soo gaarto mooshin ay soo Gudbiyeen ugu yaraan **1/3, tirade guud ee Golaha** ee soo jeedinaaya xil ka qaadidda Madaxweynaha JFS, marka lagu eedeeyo khiyaano Qaran, xadgudub culus oo dastuuri ah ama ku xadgudub sharciyada kale ee J.F.S. **Guddoomiyuhu wuxuu u Gudbinayaa Mooshinka** Maxkamadda Dastuurka, si loo ogaado in mooshinka yahay mid leh sababo sharci ah iyo in kale, sida ku cad **Qod. 92aad** ee **Qod. 92aad** ee **Dastuurka"**;

   c. Waana khalad soo jeedintaada la xiriirta iney Maxkamad u diridda ku ansaxeyso aqlabiyad fudud ee Golaha, sida ku cad Xeer Hoosaadka, waxaa ku filan iney keenaan 1/3, Guddomiyahana waxaa waajib ku ah sida faqradda hore ku qoran inuu u gudbiyo Maxakamadda, sidaa darted, soo jeedintaadu waa mid si ulakac ah u burineyso Dastuurka iyo Xeer Hoosaadkaba, mana jirto, kumana cadda Dastuurka iyo sharciyada jiraba meel ay ku xeerinayaan in sida aad jeedisay iyo siyaabo kale loo maareeyo;

   d. Arrintu markay intaa mareyso, Dastuurka, Xeer Hoosaadka Baarlamaanka iyo Sharciyada jira ee Dalka, waxay xeerinayaan inuusan jirin habraac ka duwan kuwa kor ku xusan, gaar ahaan **Guddoomiyaha Baarlamaanka xaq uma laha**, waana **xadgudub Dastuuri ah** soo jeedinta ah:

      i. In heshiis laga galo, maadaama ay tahay xadgudub ciqaabed falka lagu eedeeyey Madaxweynaha;

      ii. In labada gole ee fulinta iyo sharci dejintu ka xaajoodaan, maadaama aysan ku saabsaneyn khilaaf siyaasadeed;

      iii. In Golaha Baarlamaanka Guddoonsado u gudbinta Maxkamdda, maadaama xilkaasi uu si gaar ah mas'uul uga yahay Guddoomiyaha Baarlamaanka oo hadduu gudan waayo uu gelayo ku xadgudub Dastuurka Dalka;

      iv. Dastuurka, Xeer Hoosaadka Baarlamaanka iyo Shuruucda Dalkaba, ma xeerinyaan tallaabooyin kale oo ka duwan kuwa ay tilmaamayaan;



AGB.

v. Ma ahayn in Awoodda seddexaad ee Qaranka oo ah Garsoorka aan la ogeysiin qoraalka, loona dhaqmo ineysan Dalka ka jirin Garsoor;

5. **Mudane Guddoomiye, ku xadgudubka aan kor ku xusanay ee Dastuurka ama shuruucda Qaranka, waxaad ku wayi kartaa xilkaada, sida ku cad Xeer Hoosaadka Baarlamaanka Dastuurka Qod. 9aad faqraddiisa 1aad Xaarafka D.**

## HABRAACA SHARCIGA AH EE MAAREYNTA MOOSHINKA

**Mudane Guddoomiye;**

Hay'adaha Dastuuriga ee Qaranka, waxay ku dhisan yihiin mabda'a awood Qeybsiga ee ku Xusan **Qod. 3aad faqraddiisa 3aad**, waxayna kala leeyihiin, markaan ka hadleyno habraaca maareynta mooshinkan, xilal iyo ikhtisaasyo u kala gaar ah sida:

1. Xilka Guddoomiyaha Baarlamaanku, waa inuu Maxakamadda u gudbiyo mooshinka sida ku cad **Qod. 92aad faqraddiisa 2aad iyo Qod. 20aad faqraddiisa 1aad ee Xeer Hoosaadka Baarlamaanka**;

2. **Marxaladda koowaad**, wuxuu Dastuurka hadda jira, ka horreysiinayaa Dacwad qaadista in la hubiyo in tuhummadu ay leeyihiin saldhig sharci ah, taasina wuxuu xeerinayaa in Maxkamaddu talo ka soo bixiso sida ku cad **Qod. 92aad faqraddiisa 2aad ee Dastuurka**;

3. **Baarlamaanku waa xeer dejiye**, muddo 3 sano ahna weli ma nidaamin, Dhismaha Sharcigii lagu dhisi lahaa Maxkamdda Dastuuriga ee horyaalla Baarlamaanka, Sharciguna ma oggola "vaccum", wuxuuna tilmaamayaa, inta Baarlamaanku ka dhammeystirayo in la raaco sharciyada jira, sida ku cad **Qod 139aad ee Dastuurka**;

4. **Fasiraadda Sharciga, waxaa awood u leh Garsoorka Maxkamadaha** ee ma laha Guddoomiyaha Baarlamaanka, Maxkamadaha ayeyna xil ka saaran tahay fasiraadda iyo iswaafajinta Dastuurka iyo Shuruucda Dalka, gaar ahaan adeegsiga **Qod 139aad ee Dastuurka** iyo habka loo waafajinayo Xeerka Nidaamka Garsoorka Lr. 3 ee 12 Juun ee 1962 ee jira;

5. **Dowrka Xukuumaddu iyo Baarlamaanka ay ku leeyihiin maareyntuna mooshinkan, waa iney raacaan amarrada la xiriira dhammeystirka Xubnaha Dheeriga ah**, muddada sharciga oo ay Maxkamaddu u qabato, oo haddii ay gudan waayaan ay gelayaan ishoristaag caddaaladeed **(Obstruction of Justice);**

6. **Marka Garsoorku Dabaqayo Xeerka Nidaamka Garsoorka Lr. 3 ee 12 Juun ee 1962 ee jira, wuxuu raacayaa, Dastuurka hadda jira, marka loo dhammeystiro xubnaha**

**dheeriga ah**, waxay **geli kartaa, dhageysan kartaana tuhummada Madaxweynaha** u keeni kara xil ka qaadista, maadaama uu Dastuurka hadda jira u kordhiyey awoodda Maxkamadda Dastuuriga ay yeelaneyso, sida ku cad **Qod.109C**aad oo xeerinaya **faqraddiisa 1**aad **(F)**,;

7. Halka **Dastuurka hadda jira uu ka horreysiinayo Dacwad qaadista, hubinta in tuhummadu ay leeyihiin saldhig sharci ah**, si taasi loo gaarana, wuxuu xeerinayaa in Maxkamaddu talo ka soo bixiso sida ku cad **Qod. 92**aad **faqraddiisa 2**aad ee Dastuurka;

8. Dacwad oogayaal gaar ah looma baahno ee ku ooga dembiga, oo ahayd habraac **Maxkamadda Kore ee Caddaaladda (High Court of Justice) ay lahayd**, sida ku qeexan **Qod. 12**aad faqraddiisa **2**aad **ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee 1962**dii ee ku saleysnaa Dastuurkii 1960kii;

9. **Mudane Guddoomiyaha, adiguna kuma saxnid in Dacwad oogayaal gaar ah loo baahan karo**, maxaa yeelay, sida dastuurka hadda jira uu qabo, marka Maxkamadda xaqiijiso in eedeyntu sal leedahay, **waxaa lagu celinayaa Baarlamaanka oo xasaanadda ka qaadaya Madaxweeynaha**.

## GABOGABO

**Mudane Guddoomiye,**

Habraaca sharciga ah wuxuu yahay sida hoos ku tifaftiran:

1. In Mooshinka Xil ka qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, oo ay kusoo gudbiyeen xildhibaanada Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, si waafaqsan **Qodobka 92**aad **aad (Faqradiisa 2**aad**) ee Dastuurka Federaalka ku Meel Gaarka ah**, taasoo u dhiganta tirada guud ee BFS saddex dalool oo hal **(1/3)**;

2. Sida ku cad isla **Qodobka 92**aad **(Faqradiisa 2**aad**) ee Dastuurka Federaalka ku Meel Gaarka ah**, in ay ikhtissas u leedahay Maxkamadda Dastuuriga ah, dhageysiga eedeynta, ayna lagama maarmaan tahay ineey sugto sal ahaanshaheeda;

3. Inkastoo **Qodobka 109B**aad **ee Dastuurka** uu xeerinaayo aasaaska Maxkamadda Dastuurka, hadana ilaa iyo maanta lama dhisin Maxkamadda Dastuurka, **la'aanteedna ma baajineyso in la qaado dacwaddaan;**

4. Waxaa hubaal ah **inaaney suuragal ahayn in la waayo habraac lagu xaliyo Mooshinka Xil ka qaadista Madaxweynaha JFS**, oo ay ka keenen Xildhibaanada,



A G B.

ayna lagama maarmaan tahay in la raaco xalka cad ee ku xusan Dastuurka, Xaeer Hoosadka iyo Sharuucda dalka ee jirta;

5. **Haddaba markaan eegno Qodobka 139aad ee DFKMG** ah oo xeerinaayo sharciyada weli socda, dhammaan xeerarka dhaqan galka ah ka hor inta aanu hirgelin DFKMG ah, waxay ahaanayaan qaar sii shaqeeya, ilaa iyo inta la titirayo, wax laga beddelayo ama meesha laga saaraayo si loo waafajiyo DFKMG ah;

6. Sidaas darteed xalku wuxuu ku jiraa **Sharciga Nidaamka Garsoorka L. 3 ee 12 juunyo 1962**, oo ah sharci dhaqangal ka ah JFS, **lifaaqiisa** koowaad oo jideynaya habraaca ay Maxkamadda Sare isugu beddeli karto Maxkamad Dastuuri ah;

Haddaba **Mudane Guddomiye**,
Waxaan si Xushmad iyo Qaddarin ay ku dheehan tahay kaaga codsaneynaa, inaad tixgeliso dhammaan arrimaha aan kor ku soo tifaaftirnay ee waafaqsan DFKMG ahm, **Xeer Hoosadka iyo Sharuucda dalka ee jira**, isla markaana in:

A. La dardargeliyo habraaca socodsiinta Mooshinka Xil ka qaadista Madaxweynaha JFS, Dalkana aan loo horseedin khilaaf aan dhammaan iyo inuu khilaaf run ah ka dhex dhasho Baarlamaanka;

B. Loona gudbiyo Maxkamadda Sare oo isku beddeleysa Maxkamad Dastuuri ah si waafaqsan DFKMG ah iyo Sharuucda Dalka, muddo ku kooban seddex cisho gudohood ah oo ka bilaabaneysa 7da Settember kuna eg 9ka Settember 2015 oo haddii aan la yeelin aan qaadi doonno tallaabo sharciga waafaqsan;

Haddaba, Annagoon marnaba dooneyn inuu khilaaf hor leh oo gudaha Baarlamaanka ah, isla markaana fileyn in qasadkaadu yahay, ayaan ku rajo weynahay in xilkaada Dastuuriga aad gudato, si waafaqsan **Dastuurka, Xeer Hoosadka iyo Sharuucda Dalka**.

**MAHADSANID**

**WA BILLAAHI TOWFIIQ**